


ADHAM SHARQAAWI

WACAAL SUGAN



CABDULLAAHI SH. AXMED XASAN
(AALA-FIQIIH)

نَبَأُ يَقِينٍ

أدهم شرقاوي

WACAAL SUGAN

Turjumidii: Cabdullaahi Sheekh Axmad Xaasan
(*Aala-Fiqi*)

WACAAL SUGAN

Magaca Buugga	<i>Wacaal Suga</i>
Waxaa qoray	<i>Adham Sharqaami</i>
Waxaa Tarjumay	<i>Cabdullaahi sh. Axmad Xasan (Aala Faqiih)</i>
Waxaa daabacay	<i>Irshaad Printing Center</i>
Tirsiga diwaan gelinta	20
Tirsiga Dowliga	

Tusmada Buugga

Xuquuq-dhawr.....	11
Afeef.....	12
Mahadnaq.....	13
Hibeyn qoraha	14
Hibayn turjumaha	15
Halkan ayay guul-darradu ka timaadaa!.....	16
Waa mada-daalo uun!	18
Maamuuska qalbiga bulshada haka saarina!.....	20
Gorgortan haka gelin sharaftaada!.....	22
Dadka dunida joogo iska daa ee adiga uun is beddel.....	24
Adiga ma tihid boqorka adduunka	26
Noloshaadu waa adiga.....	29
Shaqo guri!.....	32
Talooyin loogu talagalay nolol sahlan!.....	34
Been abuur dhaqaale lagu helo!.....	37
Farriimo heersare ah!.....	40
Diin iyo adduun wadda socda!	42
Xirmo xaabeed!.....	44
Ha xirin albaabka!.....	47
Waxaan sameeynayaa diyaarado!.....	50

WACAAL SUGAN

Qalbigaaga ilaah u dhiib!	52
Qaaligeygiyow: noloshu waa iska sidaas!	55
Dhaqanka baadinjaanka (eggplant)!.....	57
Sirtu ma ahan eegidda ee waa fikirka.....	60
Rag soo saarto:.....	63
Waad furantahay!.....	66
Ma aha jacayl oo kaliya!	69
Ha jarin xariga saaxiibtinnimada	72
Karfanta ceeb ma leh.....	75
Cadowga kaliya ayaa guulaysta!	78
Inan kutubeed!.....	81
Nacasiin ma jiraan!	84
Waan ka xumahay (cudur-daar)	87
Uma eka qoraalkooda!	89
Tuugta kutubta!	91
[d.] Dii dhibic!.....	93
Caasinimada yaa bilaabay?!.....	97
Waan idin seexaneynaa!.....	100
Ka saar japan meeraha dhulka!.....	103
Guurka da' yaaraanta!	106
Carruurta iyo masaajidda.....	109

WACAAL SUGAN

Ciddii xikmad la siiyo!.....	112
Faham xumo!.....	115
Sadaqo la qariyay!	118
Liidnaan	121
Ligu filan maamuus.....	124
Runta oo loo soo noqdaa waa sharaf!	127
Dhakhaatiirey maxaa idin helay?!	130
Waxaa laga yaabaa inuu cudur daar heysto adigana aad eeddeyneysol!	133
Jaar la noqo kuwa faraxsan, adna aad faraxdide	136
Deyn aan la megeynin!.....	139
Xataa hadiil!.....	142
Ereyada la isku dhagro	145
Dadyow: waxaan nahay dadkii ugu dambeeyay!	148
Waa fursad aan darsi ka qaadan karno.....	151
Maanka miyir qabka ah.....	153
Ilmo soo rididda	157
Samee maalin farxad leh.....	160
Shumac shid!.....	162
Aan sagootinno meydhooda	165
Maxey farxad ka goysaa tan?!.....	167

WACAAL SUGAN

Waxaan ka hadlayaa kuwa aan garanayn waxay yiraahdeen!	170
Wax ka qasbashada nolosha taagan miyaa haboon mise diiwaan-gelinteeda?	173
Jaceylka!	176
Xanuunku waa qayb ka mid ah nolosha!	180
Irsaaqadda iyo madasha.....	183
Kuwa ogsoon in wax la waayi karo!	186
Ma jirto nobel suugaaneed!	189
U rabaayoobidda qaladka!	191
Way adag tahay ilaaya xad!	194
Ra'yiga guud (ra'yul caamka).....	197
Wixii jaahilnimo lagu qaatay waxaa lagu soo celin karaa caqli!....	199
Mahadsanid, maryama ina cimraan!.....	202
Waddaniyiin!	206
Mahadsanid balqiisa!	208
Meel kuma lihidiin taxanaha!	211
Waad mahadsantahay sayid yacquub -scw-	214
Amarkii ugu dambeeyay ee islaamka: qabso nuqulkaaga!.....	217
Dugsigii weynaa ee badr!.....	220
Ahaaw qofka aad tahay!.....	228
Wajiga elektarooniga ah!.....	231

WACAAL SUGAN

Rabbaaniyiin noqda ee ramadaaniiyiin ha noqonina!	234
Wax yaabaha waaray!	236
Carabta is mooday xor!	239
Abaayada weyn!	242
Wadada	244
Inkaarta halyeyga	247
Adigaa is arka	250
Xilal wasaaradeed!	253
Waxaa laga yaabaa in dhibku uu ka jiro dhanakaaga!	256
Qalbigaaga ka sii!	258
Dabciga loo dhashay lama bedeli karo!	261
Dhagarqabayaal!	264
Kaalaya aan nicmooyinka alle is xusuunnee	267
Saadaasha suugaan-yahannada	270
Cunsuriyad!	274
Faa'iidooyinka ay leedahay naagta qallafsan!	277
Dhaqankii suubanaa khatar buu ku jiraa!	279
Miyayn aaminnay iyaga?!	282
Jaceylka qaarkiis waa dilaa	285
Qofna ma dhimanayo waqtigiisa ka hore	287
Ha ajarmina	290

WACAAL SUGAN

Naashnaasha ilaah ha idiin naxariistee	293
Hal abuur iska yeel	296
Shaqooyin dhab ahaan sharaf leh!.....	299
Ku saabsan dareenkooda!	301
Waxaan rabaa inaan noqdo moobeyl	304
Xukun nooc kale ah.....	306
Hab dhaqan macaan	308
Kalsoonaada.....	311
Calaamadaha tacliinta iyo nolosha dhabta ah.....	313
Qofna isuguma toosna	315
Dagaalku waa inuu ahaado mid cad	318
Sidan bey dumarkii u hadleen.....	321
Ha goynina madaxa kalluunka.....	323
Hibeyn	326
Nimco mooyee	328
Ku dila baadilka ineydnaan sheeg sheegin!.....	331
Qadiyadda dadka kale	333
Jidkaagii waa la xiray waa la xiray	335
Xamaasad indha la'aana!.....	337
Khuraafaad caalami ah!	340
U ducee oo ha inkaarin.....	342

WACAAL SUGAN

Kastamka digaaga!.....	345
Ha jabin seebabka dadka kale.....	348
Xurmeynta dalka hooyo	351
Suugaanta gunaanadka xiriirka	354
Edeb la'aan suugaaneed	357
Saas darteed bey u dabar go'i waayeen!.....	359
Dacwooyin!	361
Shilimaadku waa masaajo.....	363
Jilicsanaan.....	365
Waxaa jira indheer-garad qarsoon	368
Dhinaca kale ee muuqaalka!.....	372
Maanka guush iyo guuldarrada!.....	374
Cad xalwa ah	376
Shaqo qosol badan!	378
Digniin	380
Waad mahadsan tahay nabi yuunusow!.....	382
Adigu waxaad raadinaysaad tahay	385
Hanuunkii baa la dhalay.	388
I sii ayaankaaga	391
Mahadsanid sayidkeenna suleymaan!.....	393
Dhab ma u yaqaanaan!	397

WACAAL SUGAN

Qof kastaa wuxuu rabaa inuu wax qoro.....	399
Aragtikale!.....	401
Mahadsanidayidkeenna ismaaciil.....	403
Is barbar dhig dhan kale laga eegay.....	406
Hawaqaata ilaahay ha idiin naxariistee.....	409
Mabaadi'duna qaybsanto!.....	411
Harkii J D P · D D G G R R P P.D.G.D...H.H.E.R.R.Z.....	413
Yaaxaday faaskii?.....	415
Dib u dhiska aduunka!.....	418
Haddaadmadaxayga kor u qaadi kari weydo, hoos ha u dhig!	420

XUQUUQ-DHAWR

Xaquuqda dhiganahaan way dhawrsantahay. Lama daabacan karo, lama guurin karo qeyb asiga ka mid ah. Adiga oo aan oggalaanshiyo buuxda ka haysan qoraaga buugga iyo daabacaadda Irshaad.

Dhigaalka, naqshadaynta iyo qaabeeynta jaldiga:

Jaabir Cabdirisaaq Maxamed (B.Hayaan)


DAABACAADDII 1-AAD 2023

Lagu daabacay

IRSHAAD BOOKSHOP

TELL: +252-619-005-929

MUQDISHO-SOOMAALIYA



IRSHAAD

BOOKSHOP

 **+2520619005929**

AFEEF

“Afeef hore labaam ama adkaysi dambe labaam”

Qoraalku qaladkiisu ma dhammaado, adiga oo waqti dheer ku bixiyay ayuu qalad ka imaanayaa, sidaa daraadeed haddii aad buuggaan qalad ku aragto ha ka dhigin wax cajiib ah oo aanan dunida ka dhicin, ee ila socodsii aniga ayaa diyaar u ah in aan saxo oo aan dib u hagaajiyo“e.

MAHADNAQ

Waxaa mahad iyo ammaan leh Allah subxaanahu watacaalaa oo ii suurta galiyay in aan afnaqo buuggaan waxtarka leh, oo carruur iyo cirroolaba wax u taraya. Nabadgalyo iyo naxariis korkiisa ha ahaato Nabiyullaahi Muxammed.

Intaa kadib waxaan u mahadcelinayaa intii sababta u ahayd buuggaann soo bixistiisa iyo faafitaankiisaba, kuwii igu garab siiyay in buuggaan uu manta gacantaada soo galo.

Si gaar ah waxaa aan ugu mahadcelinayaa waalidkey oo ahaa asaaskii koowaad ee soo if bixideyda, iyo garabkii ruuxiga iyo maadigaba ahaa, iyo macallinkeygii koowaad ee ii bilaabay qur'aanka Macallin Maxamad Yuusuf, iyo kii labaad ee ii dhameystiray: Macallin dhicisow Maxamad Kiishow.

Waxaa kaloon u mahadcelinaayaa Culimadii aan Fiqhiga kasoo bartay, sida: Sh. Xasan Cadde, Sh. Nuur Sarfiile, iyo Sheekheygii naxwaha Sh. Nuur Rooble Xuurshow.

Ugu dambayn waxaan halkaan ugu mahadcelinaayaa Cali Maxamed Tahliil (Cali Irshaad), Liibaan Cabdi Xuseen (Indha-caad) iyo dhamaan bahda Irshaad Printing.

Intooda oo dhan waxaan halkan u marinayaa duco aniga oo aan ilaawi Karin wanaagoodii, waxaanna Alle uga baryayaa inuu hoygooda ka dhigo Jannada Aamiin.

HIBEYN QORAHA

Muddo sannado ah ayaan si buuq ah wax u qori jiray!

Sheekhii Tajwiidka i barayay ayaa igu yiri: *“maku fakartay mar uun inaad shidato shumac, balkii aad mugdiga ka inkaari laheyd (eedeyn laheyd?!).”*

Waxaan ku iri: “Mugdigana?!”.

Wuxuu igu yiri: “ma jiro wax la yiraahdo **Mugdi**”.

Mugdigu macnihiisu waa in iftiinka la waayo.

Shido shumacaaga kaddib waxaa iska lumi doono mugdigee, ama noloshaada ku idleyso mugdiga!.

Kitaabkan waxaan u hibeynayaa kuwa rumeysan in mugdigu la macna yahay iftiinka oo la waayo, sidaa darteedna intii ay mugdiga inkaari lahaayeen shitaan shumac!!!.

HIBAYN TURJUMAHA

Waxaan u hibaynayaa dhiganahaygaan Cali Maxamed
Tahliil (Cali Irshaad)

HALKAN AYAY GUUL-DARRADU KA TIMAADAA!

Socrates waxa uu daris la ahaa dhakhtar, wuxuuna dhakhtarkii ku dhaleeceeyay inuu **Socrates** ku magacaabay horyaalka dhakhaatiirta, wuxuuna dhakhtarkii weydiyay: “ma u keeni kartaa caddeyn in uusan mudneyn **Socrates** magacaas, si aan adiga kuugu beddelo?!”. Wuxuuna dhakhtarkii yiri: “waxaan siinayaa sun, isagana ha i siiyo sun, midkeenii sunta ka badbaado ayaana magacaas mudnaan doonno”.

Arrintii **Socrates** wuu ogolaaday, waxa uud boqorkii qabtay ballanta maalinta tartanka, oo aheyd afartan maalmood kaddib, **Socrates** wuxuu soo diyaariyay saddex rag ah oo xoog waaweyn, wuxuuna faray inay biyo ku dhaamiyaan weelal, maalin walba ayuuna dhegaha dhakhtarka maqashiinayay!.

Maalintii ballanta ayuu **Socrates** cabay suntii uu soo diyaariyay dhakhtarkii dariskiisa ahaa, midabkiisii ayaa is beddelay, waxaana qabatay qandho, laakinse wuu is badbaadiyay saacado kaddib!.

Kaddib **Socrates** wuxuu ninkii la tartamayay siiyay qashadii suntan aheyd ee ay ragga soo dhaamin jireen afartanka maalmood isaga oo maqlaya, markii uu cabayna dhulka ayuu ku dhacay isagoo meyd ah!.

Markaa buu **Socrates** ku yiri boqorkii: “waxa aan siiyay waa biyo macaan uun, anigaana hortaada hadda ku cabi kara, mudane boqoroow aniga ma aan dilin, ee waxaa dilay shakigiisa iyo baqdintiisa!!”.

Qisadan waxaa la mid ah xaaladda aan hadda annaga ku sugan nahay, xilli laga joogo maalmo ayaan qoray:

“cilmi ahaan waxa ay dhaqsida orodka cowshu gaareysaa sagaashan kiilo-mitir saacadiiba, halka orodka libaaxu uu gaarayo sideetan kiiloo-mitir saacadiiba, iyadoo uu farqigaas jiro ayey cowshu ku dhacdaa gacanta libaaxa!”.

WACAAL SUGAN

Waxa kaliya ee arrintan lagu macneyn karo waa baqdinta, macnaheeduna waa libaaxa waxa kaliya ee dabinka u gala waa cowsha baqdinta badan. Tani waxay si cad u fasiri kartaa dunida aadanaha, oo macnuhu waxa weeye in guul-darro kastaa ay ka dhalato gudaha qofka, guushana sidoo kale!!!.

Markuu Umayya Bin Khalaf ku legday Bilaal bin Rabaax RC bacaadka Makko ee kuleylka badan, ee uu garbaashka la dhacayay marnaba Bilaal ma loodsamin, waxa uu xabadka ka saaray dhagax weyn, Bilaalna wuu loodsami waayay, sidaas ayuuna miskinkii kaga guuleystay boqorkii kibirka badnaa, sidaas bey inoo soo gudbiyeen Kutubta Siirada, Bilaal Ruux ahaan baa Islaamka laabta uga jiray uu ugu xoroobay, Umayyana wuxuu addoon u noqday aaminaadiisa baaliyowday iyo kibirkiiisa.

Qadiyadda oo kooban:

Qofka qalbiga jabsan waligii ma guuleysto, hub kasta oo uu heli karo, qofkase gudaha mooralka u dhisanyahay aakhiritaanka isaga ayaa guuleysan doonna xilligaba haka soo daahee.

WAA MADA-DAALO UUN!

Xilli sannado laga joogo aniga oo sabuuradda ku qoraya xikmadda maanta. Dabadeed, aniga oo aan waydiisan oggolaansho, waxaan garaacay albaabka maskaxdayda, fikrad ah maxaan u sawiri la'ahay xikmadda maanta oo u baahi la'ahay? Waxaan ka helay fikradda, oo sida aad ogtahiin, waxaan bilaabay inaan tan ku daro xisaabteyda baraha bulshada. Arrintu ilaa halkan waa dhacdo caadi ah oo aan mudneyn in la sheego, iska daa in maqaal gooni ah loogu talagalay! Sheekadiise igu kalliftay arrinkan, waa in mid ka mid ah axsaabteyda dugsiga wax i weydiyey, isag oo ku kalsoon xaaladdeyda, ama malaha faduul iyo war jecli, sida caadaba noo ah haddii aan bini'aadan nahay, waa haddii aan dabin ku dhacay ama la i khiyaameeyay. Waxaan la yaabay su'aashii markii hore, waxaana weydiyay sababta uu ii su'aalay. Waxa uu ii sheegay inuu u firsaday in oraahyada muddadan danbe, qaar badan oo ka mid ahi ay qaybtan hoos yimaadaan!

Waxaan ku iri: “Qofkii wax ka qoray geerida garaaca wadnaha oo ee murugo badani sababtay oo aan hore u waayin qof jecel isaga, iyo kii wax ka qoray magacyo’ (uur/xaamilo) oo ka sheegay shahwada xaqiiqadan leh isagoon weligii uur yeelan. lama waydiin doonno waxa uu qorayo!”.

Saaxib arrintu wax kale ma’aha waa madadaalo uun. Waxa ka run ah arrinta qoraaga, sidoo kale waa ka run xagga akhristaha, jumlad kasta oo aan soo qaadannayno ma’aha mid dhab ah oo aan ku nool nahay, ama waaya-aragnimada aan soo marnay ee waa madadaalo uun. Kii soo xigta jumlada ah: “Ma jiro wax ka daran dhicista maaskarada aan mar u haysannay weji daAb ah!” Looma baahna in indho-shareerka uu ka soo dhacay wejiyada uu garanayay, ee waa uun in uu eraygan si lama-filaan ah ugu soo booday, waa uun madadaalo. Qofka soo

xiganaya jumlada ah: "Aad bay kuu necbyihiin, si dhow bayna kaaga war qabaan!" Looma baahna in uu yahay Bashar la neceb yahay oo si dhow loo daawado, waxaa laga yaabaa in uu fiican yahay, dadka ku xeeranna ay jecelyihiin oo isaguna uu jecelyahay, wax kasta oo arrintu ka hadleysaana ay tahay arrin soo boodo ah, waa madadaala uun. Qofka soo xiganaya oraahda ah: "Marka horre sharaftayda, marka tobanaadna adiga!" Looma baahna in loo arko inay jirto cid uu ka difaacanayo sharaftiisa, oo uu isku dayay inuu ka dhigo mid liita! Waxaa laga yaabaa in uu la joogo kuwa sharaftiisa daneynayo oo isagana karaameynayo, arrintan badankeedba ay iska tahay uun soo booddo kusoo dhacday, waa madadaalo uun. Qofka soo xiganaya: Mid iyaga ka mid ah weedhan: "Gabi ahaan waa adiga!" Khasab ma aha inuu yahay qof aad wax u jecel, muhiim ma ahan inuu rabo inuu farriin u diro midkood, waxaa laga yaabaa in qof aan asal ahaan jirin uu beddelo, waxaa laga yaabaa inuu yiri isagoo aan ogeyn, maxaad waajib uga dhigeysaa in qof kasta oo raba inuu wax sheego uu kula socodsiiyo, dhammaan arrintu waxay tahay weedhu ku timaado soo booddo, waa uun madadaalo. Qofka soo xigtay weedha ah: "Iska dhig mid ka kaaftooma, xitaa haddii aad u baahan tahay iyaga!" ha u fahmin inuu cid baahi u qabo! Waxa laga yaabaa in uu ugu sarreeyo kuwa isku filnaanshaha gaaray, oo laga yaabaa inuu heysto taageero jaceyl inta aad fileyso in ka badan, si kastaba oraahdu waxay kaga soo go'day lama-filaan!, waa uun madadaalo ee ma dhaafsiisno. Dadka u daa danahooda, oo hadallada ha daba gelina, inkaar kugu dhacday faduuliyoow!

[Al-Wataan 7/12/2017]

MAAMUUSKA QALBIGA BULSHADA HAKA SAARINA!

Sannadkii 1880-kii, boqoraddii **Thailand** ayaa hafatay, doontii ay saarneyd ayaa la degtay, mid ka mid ah ilaaladeedana kuma dhicin inuu badbaadiyo, dhammaantood way istaageen iyagoo eegaya iyada oo nafteedii ugu dambaysay sii dhibceyso, sababtoo ah sharcigu wuxuu dhigayay: Boqoradda qofkii jirkeeda taabtaa ciqaabtiisu waa dil. Dabcan anigu ma diidani sharci ilaalinaya haybada qofka talada haya, haddii uu caqli-gal yahay, aanu ka hor imanayn nidaamka aadamiga, waxa aan diidanahay waa sharci dilaya maamuuska dadka. Haddii uu nin gaari watay uu qof lugaynayay ku dhufto oo uu cararo oo uu ka tago isagoo rafanaya oo dhiigiisa baxayo, oo aad aragtay, akhlaaqdaaduna ay diiday wax aan ka aheyn in aad qaado oo aad gaadhigaaga geyso cisbitaalka kuugu dhow, oo uu jidka kusii dhinto, ma dammaanad qaadaysaa in aanay kuula dhaqmi doonin sidii adiga oo isaga dardaray?.

Hadday booliisku cusbitaalka ay yimaaddaan oo aad Eebbe ku dhaarato, adoo dhaar ku maray dhammaan kutubtii Eebbe uu soo dejiyey oo dhan, in hawsha aad ku leedahay qadiyadan ay tahay kalliya inaad tahay bani'aadam ixaan sameeyay, ma fileysaa inay kugu daynayaan sidaas?

Dad waa kuwaas uun, maamuuska ayey kaa dilayaan, waa ay ku ciqaabayaan dabadeedna waxaad bixineysaa diyadooda, ... Qof kale soo dhaaf qof waddada dhinaceeda jiifa, oo isaga dhaqaaq maxaa yeelay ma doonayo in ay ku dhacaan waxa kugu dhacay oo kale!

In badan oo sharciyadeenna iyo dhaqamadeenna ka mid ah waxay dadka ka dilaan maamuuska. Midka lacag lagu leeyahay ee haddana go'aansada inuu qofkii lahaa ka cunno, wuxuu rabaa oo keliya in dadku aanay gacmahooda is gaarin (is caawinin). Qofka garaaca albaab rer leeyahay, isaga oo raadinaya lammaane uu guursado, kaddib ay reerkii u sama falaan, oo aanay ku kallifin wax awooddiisa ka badan, bal ay ku garab galaan sidii uu arooskiisa u hirgeli lahaa. Isagana kula dhaqmi

waayo wanaaggii, qofkaas waxaa la dhihi karaa wuxuu rabaa in ay dadka ku wadda macaamilaan xikmaddii aheyd: “qofkaan meherka lagu adkeynin, waxaa u sahlanaato inuu wax furo”. Qof kasta oo jecel inuu gobannimo kula macaamilo qofkii gabadh kasoo doonto, wuxuu muujin doonaa ka fiirsasho, maxaa yeelay qof liita ayaa horray u dilay qeyb ka mid ah maamuuska. Ficillada xunxun waxaa ugu sii daran inay dadka wanaagga ugu muujiyaan wax aan laga fiirsan sameyntooda, sama falkana u tusiyaan qar iska tuurnnimo. Arrinkuna wuu ka ballaadhan yahay fal shakhsi ahaaneed, kana weynyahay shil qofeed, waa sun ku faafta oogada maamuuska dadnimo ilaa ay ka disho. Ilma yar baan ahaa mar ay ayeeyday ii sheegtay nin jeclaaday faras nin kale leeyahay, markaasna uu ka codsaday in uu ka iibiyo, balse uu milkiilihii uu ka diiday inuu ka iibiyo, diidmadaas ayaana sii badisay jaceylkii uu u qabay faraska,

Markaas ayaa tuug isku-xilqaamay in uu u keeno faraskaas, wuxuuna tuugii aaday wadadu marayey ninkii faraska lahaa, wuxuuna isku tuuray waddada dhinaceeda, isagoo iska dhigaya inuu la ildaran yahay xanuun. Markaa ninkii faraska lahaa intuu soo degay ayuu ninkan miskiinka ahaa saaray faraskii, wuxuuna qabtay xakamihii faraska isagoo jiidaya....

Tuugii baa ku yiri: “ma mudnid inaad ii hoggaamiso faraska”

Wuxuuna ninkii ugu jawaabay: “waxaad tahay qof xanuunsan ee sidaada u saarnaw”

Wuxuuna tuugii ku yiri: “haddii taas lama huraan aad ka dhigtay, aniga iisoo dhiib xakamaha faraska si aan gacanteyda ugu heysto, si aan maamuuskaaga u ilaaliyo”. Markuu xakamihii gacanta u gelshay, ee uu faraskii ku negaaday buu cagta orod ku dhiftay, ninkii faraska lahaa baa ka daba qeyliyay isaga oo leh: “dadka haddii ay ku weydiyaan halka aad faraskan ka keentay, ku dheh: **waan soo iibsaday**, cidna halla wadaagin fal xun ee aad sameysay, aniga waxaan ka baqayaa in maamuuska dadka niyadooda uu ka dhinto!”

[*Al-Wadaan: 10/12/2017*].

GORGORTAN HAKA GELIN SHARAFTAADA!

Waagii gumaystaha Ingriisku ka talinayay Hindiya, sarkaal Ingiriis ah ayaa nin reer hindi ah wejiga ka dharbaaxay, ninkii Hindiga ahaa ayaa feeray oo dhulka ku dhuftay sarkaalkii ingiriiska ahaa. Sargaalkii intuu u soo noqday Jeneraalkii ayuu warkii u sheegay, ka dibna wuxuu ku yiri:- waa inaad dishaa, Jeneraalka wuxuu soo weeraray ciidanka boqortooyada. Laakiin Jeneraalkii ayaa ku yiri: qaad konton kun oo **Rupi** oo u dhiib Hindiga si ay ugu noqoto carbuun loogu cudurdaarayo. Hindigii waxa uu ka aqbalay haddiyaddii aakhirikii u noqotay Ra'samaal si ugu bilaabo ganacsi uu in badan ku taamayay, markii ay lacagtiisii korortay, oo uu gaaray in dadku isu sheegaan qiimihiiisa iyo tanaadnimadiiisa, ayaa Jeneraalkii sarkaalkii ku yiri: “Hadda gurigiisii tag oo ku hor dharbaax ilaaladiiisa iyo adeegayaashiisa!”. Sarkaalkii wuxuu qaatay amarkii janaraalka, wuxuuna abaaray gurigii ninkii hindigaahaa, wuxuuna ku hor dharbaaxay ilaaladiisii iyo adeega yaashiisii, hiniigiina wuu dhoolla-caddeeyay, wax tallaaba ahna ma qaadin. Sarkaalkii waa uu soo laabtay wuxuuna Janaraalkii u sheegay wixii uu kala kulmay ninkii hindiga ahaa. Markaas ayuu Janaraalkii ku yiri Sarkaalkii: “markii hore Hindiga ma uusan aheyn qof heysta wax ka badan sharaftiisa, iyada buuna difaacanayay, laakin markii aan ka iibsanaay karaamadiisii iyo sharaftiisa, waxa uu dhex degay ganacsigiisa iyo badeecadihiisa, wuxuuna ka fogaaday dhammaan wixii ka carqaladeyn kara oo ay ku jirto ilaalinta sharaftiisa”. Had iyo jeer dadka waxaa laga wareeraa dhanka sharafta, maxeysa badanyihiin kuwa iibisada, maxeysa yaryihiin inta ilaashata, ee qof kasta oo la gorgortamo, oo la falanqeeya oo wax u buunbuuniya, oo wax ku dhiirri geliyo ku yiraahdo “*Macaadallaab*”. Waa dhif iyo naadir in arrintu ahaato sidii gantaal furan sida xaalka midka mustacmarka ahaa iyo milkiilaha dhulka, in kasta oo aanan kula dareynin tanaasulaadda halkan baabka sharaf dhaca, laakiin waxan ku tiriyaa qayb ka mid ah khiyaamada qaran, sharafteenna ayaa inta badan ayaa khuraafaad ku ah inta badan hab-dhaqankeenna maalinleed, iyo faahfaahinta ugu yar ee nolosheenna. Magaca jacaylka dartii, ayaad arkeysaa qof aqbalay in uu caga saar ahaado, dabadeedna naftiisa ugu

qalbi qajiyo, inuu ku yiraahdo: “*Ma jirto sharaf ilaashi ka dhax jirta kuwa is jecel!*” Ninkan sheeganay jaceylka ayaa is illowsiinaya in kuwa u kala dooraya qalbigooda iyo sharaftooda, ee doorta qalbigooda, in aanay u qalmin in la jecleado. Waxa kaloo uu ilaabay wax kasii muhiimsan oo ah in kuwa sida dhabta ah inoo jecel aanay waligood nagu dayaceynin doorashadan waligood, sababtoo ah sharafteenna ayaa ka mid ah sharaftooda. Magaca irsaaqad doonka, ayaad arkaysaa qof wejigiisa ku gadanayo, markaasna naftiisa qalbiga dejinayo, inuu ku yiraahdo: “*Rootiga helitaankiisa wey adagyahay!*”. Rootigii lagu cajiimay sharaf dhac roodi la’aan baa dhaanta, rootigaa naga dhigaya addoon halla waayo, sow ma moodid sidii qof aan irsaaqddiisa gacanta Rabbi ka sugaynin!.

Magaca dallacaadda shaqada isaga oo ku marmarsiyoonaaya, ayuu mid wuxuu u basaasaa saaxiibbadiis maamulaha (*loo shaqeeyaha*).

Si loo helo aqoonsiga madaxda sare awgeed, ayay u badanayaan dadka kaba qaada yaasha ah. Faqriga danaha magaciisa iyadoo lagu marmarsiyoonaayo, ayaa garka iyo cimaamadaha lagu kala gadanayaa dhowr dirham, waxay bartaan kalimadaha Eebbe (Quraanka) oo kula socdaan dariiqa shaydaanka.

Meelaha qaar waxa is indha tirku noqdaa darajo, dhega daboolashaduna noqotaa qiimo asluubeed oo sarreyso, indhaha oo la xertaana amaan la moodo. Waxaan oo dhan waxay noqon karaan wax amaan mudan, haddii hadafka laga leeyahay uu noqdo isku day lagu raadinayo dadka kale in la ixtiraamo ilaa nafta ugu dambeyso, iyada oo Ilaahay ajar laga raadsanayo. Laakin marka ay noqoto mid lagu raadinayo amaan ay dadka bixiyaan ogow in karaamada lughooda ay ku hoos jabtay. Sharaftaada ayaa ka weyn gacaliyahaaga, oo ka weyn rootiga aad raadineyso, oo waliba adiga xataa kaa weyn, qofka sharaf la’aanta ah waa qof aan jirin!

[*Al-wadan: 12/12/2018*]

**DADKA DUNIDA JOOGO ISKA DAA EE ADIGA UUN IS
BEDDEL**

Waxa ay sheeka xariirtu leedahay:

Waxa la yiri boqor baa ka talin jiray dal aad u ballaadhan, maalin maalmaha ka mid ah ayuu damcay inuu safar dheer u baxo oo uu boqortooyada dhex mushaaxo, cagihii baa ka bararay waddooyinka aadka u daran iyo qodaxdooda darteed.

Wuxuu soo saaray amar boqortooyo oo ku aaddan in dhammaan waddooyinka boqortooyada lagu dado harag.

Laakin mid ka mid ah la taliyayaashiisa ayaa ku yiri: “taasi suurta gal ma ahan mudane boqorow, ee ka waran haddii aan kuu sameyno Maqaar aad lugaha gashatid, sidaasna ay waddooyinkii sidii aad u rabtay u noqdaan”, arrintii wey cajib gelisay boqorkii, sidaas beyna ku dhalatay fikraddii kaba sameynta.

Dadka oo dhan waxay rabaan inay adduunka beddelaan, laakinse ma jiro cid dooneyso in ay iyada is beddesho, iyadoo ay jirto in haddii aadanuhu beddelo nafasdiisa uu adduunka si fudud isu beddeli lahaa! Adduunyadu xaqiiqadeeda waa isha iyada lagu eegayo, dhammaanteenna waxaan leenahay isla ishaas, laakin isku aragti ma nihin!

Tusaale kale oo fududeeynaya fikraddan u muuqata mid adag iga hoo:

Laba ruux baa waayaya ubad ay dhaleen.

Midka hore wuxuu leeyahay: “Miyaan Ilaah arkayn waxa aan aniga ahayn ee uu dhibo.

Inaad dhinacan xumaanta laga eego waxay nolosha ka dhigaysaa cadaab aan loo adkaysan karin!

Midka labaadna wuu murugoonayaa maadaama uu bini’aadam yahay, wuu ka walaacayaa inuu aabbe yahay awgeed, balse wuu is-dhiibayaa

oo ku qancaya qaddarta Alle, Ilaahayna wuxuu u baryaa si adab ay ku jirto, maadaama uu Alle fuliyay wax uu isaga qaddaray.

Midkii hore caradii umeyna soo celin wiilkiisii, midkii dambena ku qanciddiisii qaddarta Alle umey soo celin inankiisii, laakinse waxaa kala duwanaatay aragtida ay labadoodu ka qabaan mixnada nolosha.

Tuulo yar, oo ay saqafyada guryaheedu dilaacsan yihiin, roobka da'aayana, saqafka sare biyaha uga soo qulqulayaan guriga.

Midka kowaad ayaa roobka inkaar ula fariista, kan labaadna waxa uu isku dayaa inuu hagaajiyo saqafka sare ee gurigiisa si uu roobka isaga difaaco! Marka xilliga dambe ee roobka la gaaray, roobkii sidiisii buu gudaha guriga ee ninkii koowaad ugu soo ququlayay, laakinse ninkii labaad gurigiisa wuu badbaaday.

Ninka hore wuxuu rabay inuu dunida wax ka beddelo, in cirku joojiyo roobka, maxaa yeelay gurigiisa saqafka saaran ayaa dildillaacsan, midka labaadse wuxuu gartay in mushkiladdu aannu aheyn roobka da'aya, ee ay tahay saqafka guriga oo dildillaacsan, markaas ayuu gurigiisii hagaajistay.

Dunidu sidaas bay ahaanaysaa inta aan dul joogno, roobkuna wuu da'ayaa ma joogsan doonno, gacalkuna ma noolaan doonno waligiis, jaamacaduhuna ma noqon doonaan bilaash, cisbitaallada laguuma ogolaan doono haddii aanad dhiibin lacag, howsha adduun waa ay dhib badnaan doontaa, guushu wey adkaan doontaa. Dukaamada lacag la'aan wax kuma bixin doonaan, guryahana waxaa gudahooda ka jiri doonno muran! Qofkii leh saqaf dunsan wuxuu rabaa in aannu roobku gelin gudaha gurigiisa. Qofkii ubad dhalay wuxuu jecelyahay inay waligood noolaadaan. Qofkiisa doonaya shaqo fudud, guul sahlan iyo suuq aan hanti u baahneyn asiga oo aan fardhaqaajin waligiis waa uu sugayaa.

Wuxuu kubbadda adduunka ku dul taaganyahay khalad, marka aaminaadiisa wax haka beddelo, ama duni kale ha raadsado si uu ugu noolaado!

[Al-Wadan: 12/14/2018].

ADIGA MA TIHID BOQORKA ADDUUNKA

Baaxadda dhulku marka loo eego koonka kama badna dhibic biyo ah oo lagu riday badweynta, haddana mid ka mid ah dadkii ku noolaa meerahan oo kibir la daaca qurmay ayaa mar yiri “Anigu waxaan ahay Rabbigiinna ugu sarreeya!”

Muhiimadduna waxay tahay in kan sheegtay inuu yahay Rabbigii Sarreeyay, uu Rabbigeenna sarreeya ka waraabiyey biyaha badda, dabadeedna uu ku tuuray isagoo meyd ah xeebta, si uu kuwa isaga ka dambeeya ugu noqdo tusaale!

Alla aayaduhu badanaa, oo cid wax ku qaadato yaraa!, Wali waxaa sii jira dad u haysta in ay yihiin xudunta koonka oo qof kastaa uu ku meereesto meertadiisa, si aadan iyaga uga mid noqonna maskaxda ku haay arrimahan soo socda:

1. Waddada ugu fiican ee aad gacaltooyo dadka uga heli kartid waa inaad marka hore adiga tusisaa! Si aad u dareento gacaltooyo, waa inaad marka hore adiga dadka dareensiisaa, waa doqonnimo inaad qaadataa salladaada iyo middi qaroofeydaada, oo aad abaartid dhul aadan horay u beeranin, kaddibna aad filato inaad kala soo laabato sallad buuxdo oo mira ah, si aad wax u gurataa marka hore waa inaad beerataa!

2. Dadku had iyo jeer ayey is beddelaan, cabirradaadii hore adaa iska leh ee iyaga ma khuseyso, harqaan tolaha maahirka ah haddii uu maanta cabir kaa qaado, si uu dhar kuugu tolo, kaddibna aad bil kaddib u timaado, mar kale ayuu ku cabiraa, inkastoo ay cabirkaagii hore buuggiisa ku yaallo!

Marka waa inaad noqotaa harqaanle maahir ah, adigaba maanta ma tihid shakhsigii shalay sannad ka hor joogay, ee ha aaminin dadkuna in ay sidoodii sii ahaadaan!

3. Waxyigii samada kasoo degay dad badan oo dhulkan ku nool si fudud uma raacin, iyadoo la ogyahay inuu waxyi yahay, marka ha filan in loo wadda sacbiyo wax kastoo aad sheegtid, si kastaba ha kuula toosnaadee.

Xusuusnow adigaba inaad diido afkaar badan oo qofka dhahayo uu aamin sanyahay dhab nimadeeda, marka dadka haka fara maroojinin xaq aad adiguba diiday inaad u tanaasusho isaga oo kale!

4. Waddada aad dooratay inaad ku socoto ayaa ah waddadaada, qof ku nool dhulkanna ma doonayo inuu kula maro.

Waa gar inaad dadka niyad sami u muujisaa, laakin niyad samida aad u muujineyso iyada waa wax, inaad aad ka dhigtaa sida aad rabtana waa wax kale.

Ha filan in ay qof kuu noqoto sidii malaa'igta oo kale, inaad adiga uun taas niyeysatay aawgeed, dhulka u mar sidii adiga oo kaligaa ku nool.

5. Wuxuu ibnu Khaldun yiri: “haddii aannu dookha dadku kala duwanaan laheyn badeecada ayaa fasaadi laheyd”.

Wax yaabaha muhiimka kuu ah waxaa dhici karta in ay qof kale muhiim u noqdaan, sidoo kalana waxa uu daneynayo ayaa adna muhiim kuu noqon karo.

Dadka kale noloshooda iyaga ayaa leh, waxayna gar u leeyihiin in ay u noolaadaan sidey wax u arkaan, naftaada ha caadeysato in kala duwanaanshaha ra'yigu yahay qeyb ka mid ah nolosha, oo aannu aheyn wax soo galooti ku ah.

6. Dadka mararka qaar ma fahmaan waxa ay yihiin, ee halla yaabin marka uu fahamkaaga xumaado!

7. Haddii aad aragtid qeyb ka mid sawirka, iyadoo la ogyahay inuu sawirku leeyahay qeyb kale oo aadan adigu arkeynin, marka ha go'aaminin inaad wax walba adiga aragtay!

Markii aan yaraa waxaan is dhihi jiray “Alla aabbahey ayaan ka baqaa, cid xukun kusoo rogeysaa ma jirto, halka uu innaga nagu soo rogayo xukunka”, laakin maanta markii aan weynaaday oo aan noqday aabbe, waxaan is iraaahdaa: “alla maxaa ka macaan inuu qofku ahaado carruur, maxaase ka dhibaata badan inuu noqdo aabbe”.

Markii aan ahaa arday waxaa dhihi jiray: “hambalyo macallin, wax ma aqriyo, wax ma xifdiyo, wax uun buu sharxaa oo iskaga dhaqaaqaa”, laakin maanta markaan noqday macallin waxaan iraaahdaa: “hambalyo ardayooy, waxaad iska fadhidaa kursigaaga”.

8. Dadku waa ay ku kala duwanyihiin dhanka caqliga, waxaad adiga dhaqsi u fahamtid, dadka qaarkiis bey ku qaadaneysaa waqti siduu u fahmi lahaa.

Sidoo kale adiguna waxaad u baahnaan kareysaa inaad waqti u hesho si aad u fahamto waxa ay fahmaan dadka kale, waxaana dhici karta inaadba fahmi weysid.

Sidaa darteed Paulo Coelho waa qoraaga riwaayaddii Alchemist, adna ma tihid, Bill Gatesna oo ah milkiilaha Microsoft, adna ma tihid milkiilaha Microsoft!

9. Haddii aad awooddid wax, taas macnaheedu ma ahan inuu qof walba yaqaanno waxaas!

Cayaartoyga kubbadda cagta waxay gulfi karaan sagaashan daqiiqo, aniga iyo adigase waan xiiqeynaa rubi saac kaddib, xataa haddii aad gulfan karto sagaashan daqiiqo dadka dunida ku nool boqolkiiba sagaashan ma awooddaan inay sidaas yeelaan.

10. Hoga tusaaleyntii hore waxaan kugu iri:

“haddii aad rabtid inaad gacaltooya kasbatid waa inaad marka hore adiga soo gudbisaa gacaltooyada”, waa hagaag, waxaa la gaaray waqtigii aan ku dhihi lahaa: “waligaa ha is dhihin dadka ha kuula macaamilaan sida aad ula macaamishid oo kale”.

[Al-wadan: 17/12/2017].

NOLOSHAADU WAA ADIGA

(Adigeey Kuu Taal taladaada)!.

“Nin tuur leh isagaa siduu u seexdo yaqaan”

Tusaalooyinka loo soo qaato in dadku aanay cidna u deynin arrimahooda fara gelin la’aan waxaa ka mid ah sheekadan:-

Juxa iyo wiilkiisa ayaa alaabtoodii soo rartay si ay ugu safraan magaalo ay jaar yihiin, si ay danahooda uga qabsadaan, taasoo aan laga heli karin tuulooyinka ku xeeran iyaga, markaasay dameerka dul fuuleen, sidaana ku dhaqaaqeen.

Markii ay gaareen tuuladii ugu dhaweed, ayaa dadkii waxay ku yiraahdeen: "Alla, labadan nin ee naxariista daranow, ee dameerka dhabarka uga saaran sida naxariista daran maxaa idin helay!"

Markaasaa wiilkii soo degay, Joxana iska dul joogay dameerkii, markay tuuladii xigtay gaareennna dadkii waxay ku yiraahdeen: "Aabbe amar ku taagleeye ah, dameerkii buu saaranyahay, wiilkiisii maskiinka ahaana dhib buu ku jiraa!"

Markaasaa Juxa degay oo wiilkii saaray dameerka, waxay socdaanba markii ay gaareen tuuladii u dambaysay ee magaalada weyn ka horraysay, dadkii waxay yiraahdeen: "Waa maxay wiilkan caasiga ah oo dameerka dhabarka ka saaran aabbihisna uu lugeynayo?!"

Markaas Juxe iyo inankiisii waa ay ka wadda degeen Dameerkii, sidii beyna u wadda lugeeyeen, markii ay gaareen Magaaladii weyneyd ee ay u socdee dadkii magaalada deganaa baa waxay yiraahdeen: “waa laba nacas, waa ay lugeynayaan, iyaga oo raaci kara dameerka”.

Juxa, dhanka kale, waa shakhsiyad dhab ah, oo aanay waxba ka jirin beenaha loo aaneeyo.

Ninkuse waxa uu dadka dhexdooda ku noqday haldoor, mar kasta oo uu qof sheeko ay ku jirto wax nacasnimo ah curiyaba u nisbeeyo isaga!

Sidaa ayee gabay kasta ee jaceyl ka hadlayo haddii la aqoon waayo qofkii yiri loogu nisbeeyo Reer Cadri, oo ahaayeen Qabiil carbeed oo ku caan baxay jaceylka!

Sida riwaayad kasta oo la yaab leh loogu nisbeeyo Asmaci ilaa ay gaartay arrintii in ninkiiba loo aqoonsado beenloow, ha yeeshee wuxuu ka mid ahaa dadka carbeed kuwa loogu kalsoonyahay dhanka wax soo tebinta iyo amaanadaba.

Sida sheeko kasta oo ku saabsan gacan adeega (bakheyl-nnimada) loogu nisbeeyo reer Marwa ka dib markii Al-Jaaxid uu ku tilmaamay qibrada bakhiiil-nnimada!

Laakinse warku isla warkii ma ahan! Ee markan bal aan dib ugu laabanno sheekadii aan idiin soo waday:

Dadku waa isla dadkii xilli kasta! Hiwaayadaha ay ugu jecel yihiinna waa inay arrimaha dadka farageliyaan! Waxay inta badan si mutadawacnnimo ah u baaraan dhibaatooyinka dadka kale oo ay xalna u raadiyaan.

Dhab ahaantii waxaan shaki ku jirin kuwaas in aanay iyaga mashaakilkooda aanay xal u heli karin, in dadka kale mashaakilkooda ay xal u helaanna waaba kasii darantahay, (Haantii geleeda kaafisaa geela kale hambeestaa), laakiin waa dhaqan la caadeystay, faduul, howl la'aan astaan u noqotay dadka ku nool meerahaan dhulka la yiraahdo!

Waxaana taas kasii daran in mararka qaarkood aadan garanayn waxa dadka u roon oo ay ku farxi karaan si aad u sameysol!

Qofkii naagtiisa la tashadaa waxay u aaneeyaan xukumane (Daacatunisaa), kii aan iyada la tashanina waxay u yaqaanaan amar ku taagleeye.

Haweeneydii ninkeeda ka dambeysa waxay u yaqaanaan mid shakhsiyad liidata, tii raggeeda ku dhega adeegtana waxay u yaqaanaan rag iska yeel.

Qofkii laba shaqo ka shaqeeya si uu baryada ugu kaaftoomo waxay u yaqaanaan “adduunyo laqe”, qofkii arka isagoo arrimihiisa caafimaad qaba waxay weydiinayaan: muxuu shaqo labaad u raadin waayay!

Haweneydii la guursado oo gurigeeda isku taxalujiso, waxay yiraahdaan waa miskiin, caqli bay lahaan jirtay maantana waa tan is dayacday, tii la guursado ee go’aansata inay waxbarashadeeda sii wadato, waxay is waydiyaan: Maxay nafteeda ugu hibayn waysay daryeelka gurigeeda?!

Qofkii asaxaab badan leh ee garoomadooda iyo maqaaxiyaha u raaca waxay yiraahdaan waa qof lumay oo ujeeddo la’aan ah, kii wax barasho ku mashquula oo dadaala oo waqtigiisa buuggaag akhris kaliya siiya waxay yiraahdaan waa qof adadag!

Marka noloshaada adigey kuu taal, ee sidii kuu macaan u noolow, mar hadaad ku qanacsan tahay inaad wax saxan samayneyso, oo haka raadin indhahooda qiimahaaga, waxaa kugu filan inaad indhahaaga aragtidooda ku weynaato!.

Haddaad u malaynayso in dadka hadalkooda laga badbaadi karo, marka loo eego xaalad kasta oo aad ku sugan tahay, waxaad aqoonin dadka, dadku waa kuwii ku yiraahdeen Nebiga NNKH (waa saaxir ama wuu waalanyahay)!

Markay u heli waayeen danbi Luud CSW wax eed ah, waa kuwii yiri:

[ka bixiya Luud iyo Ehelkiisa Tuuladiinna, iyagu waa dad is dahiriyeec].

[Al-wadan: 19/12/2017].

SHAQO GURI!

Sannadkii 1950-kii, macallinkii Talyaaniga ahaa Roberto Nevels ayaa abuuray shaqada guriga si uu ciqaab uga noqdo ardaydiisa!

In kasta oo kumanaan fikrado waxbarasho oo dhaxal gal ah iyo aragtiyo ay muran galeen qaadshadooda iyo ka taggiddooda, ayaa meerahan aan ku noolnahay oo dhan looga aqbalay aragtida Roberto Nevels sida inuu yahay Nebiga iskuulada!

Shar wadahaas wuxuu donayay inuu ciqaabo ardayda uu wax baro, laakin wuxuu ciqaabay dhammaan ardayda ku nool meerahan.

Muddadii aan ciyaalka ahaa waa aan nebcaan jiray shaqada guri marka iskuulka la iga soo amro, taas waxaan la wadaagay dhammaan ardayda masaakiinta ah ee dunidan ku nool. Waxaan ku xallin jiray qaabka tusaale ee dani waa seeto!, aabbahey iyo hooyadey kama kaftamaan dhanka wax barashada iyo salaadda, laakinse wixii kale waa lagala doodi karaa.

Ilaaya maantana oo aan noqday nin mas'uul ah, ardayda wax bara waxaan necbeystaa inaan ardada u diro shaqo guri, haddaanay dan igu kallifin, waxaanba la yaabaa macallimiinta aaminsan in shaqada guri ay tahay wax aasaas u ah wax barashada!

Taas waxa aan idinku darayaa maanso suugaaneed, sannadkii hore, markaan arkay macallimiin ku nadnaadaya in ay ardayda u qaybiyaan fasaxyada jiilaalka shaqo guri, ayaan fasalka soo galay, oo u xilsaaray hawl, waxaan ka codsaday inay ku qoraan buug-yarahooda, xilkuna wuxuu ahaa sidan:

Waxba ha aqrinina! Aamusa oo fadhiista dariishada agteeda, dhagaysta sheekooyinka, caba shaaha, is diiriya, had iyo jeer waxaa jira wakhti aad wax ku barataan, laakiin farxaddu had iyo jeer ma taagna! Ardayga Dugsiga hoose ee dugsiyadeenna wuxuu sitaa shandad miisaankeedu yahay rubuc ka mid ah isaga culeyskiisa,

marka la eego baaxaddana, waxa ay u egtahay shandad ciidanka ee rasaasta lagu keydiyo xilliga dagaalka ka hor!

Walina ma dhihin Bismillaahi, maantana ma bilaaban! Kaddib ardaygii, wiilkii yaraa ee sannadkiisu fara ku tiriska ahaa, saddex meelood meel maalintiisa dugsiga buu ku qaataa, macallinka xisaabta ayaa sagootiya, una gudbiya macallinka sayniska, kaddibna xiisada saddexaad Naxwe iyo qawaacid, markaas ayaan is weydiineynaa sababta carruurteenu iskuulka u neceb yihiin!

Halkii aan Ilaahay dartii u xorayn lahayn oo aan carruurannimadooda u dayn lahayn, waxaan ugu sii darnaa in dugsiga ay dhibkii kasii qaataan oo guriga la tagaan! Ayaandarrada jirta ayaa ah in macallin kastaa rumaysto in aannay jirin cid isaga ka roon sidaas buuna ku dhaqmaa sidaas buu ardayga uga baxaa macallimiinta kadeedkooda, si uu ugu dhaco dabinka qoyskiisa ee guriga!

Sida ay ila tahay, haddii saddex meelood meel ka mid ah maalinta uu ardayga dugsiga ku jiro ay ku filnaan weydo inuu barto, waxa aan doonayno, taasi waxa ay tilmaamaysaa hal shay, kaas oo ah in manhajka waxbarashadu uu yahay mid fashilan oo bini'aadannimada ka baxsan!

Waxanna si adag u rumaysanahay in aannu shaki ku jirin in sida aannay shareecadaba u bannaanayn in cibaadada laga dhigo ciqaab, sida inaad ku tiraahdo ilmahaaga “haddii aadan saas samayn, waxaan kugu xukumayaa inaad tukato boqol Rakcadood”.

Sidaas oo kale shaqada-gurigana ma bannaana tiro iyo tayo intaan le'eg inay gaarto, sababtoo ah waxay u ekaaneysaa ciqaab, waxayna khusaysaa xogta oo qofka bani'aadamka ah lagu xaasido!

Iskuulada waxay iila mid yihiin masaa'jidda, goobo aanan qiyaasi karin wax la mid ah oo dunida guudkeeda saran, sidaa dareteed waxaan dhex joogi doonaa dugsiyada inta nafta igu jirto, laakiin waxaan ka soo horjeedaa inay noqdaan dugsiyada xabsi.

[*Al-Wadan*: 12/21/2017].

TALOOPYIN LOOGU TALAGALAY NOLOL SAHLAN!

Tan iyo markii aan indhaha ku kala qaaday adduunka, waxaan maqlayay dadka oo leh: "Noloshu way adag tahay!"

Shakhsiyan waxaan ku raacsanahay in noloshu ay adag tahay, Shawqina hal-abuur buu sameeyay markuu yiri shidaa laga maraa! Laakiin kuma raacsani in ay adagtahay, haddii adeyga ula jeedaan in aan la fahmi karin!

Noloshu waa ay fududahay in la fahmo haddii aan naqaanno sida loo eego, si aysan u noqon aragti maran, halkan waxan kaa siinayaa talooyin aan filayo inay kaa caawin doonaan inaad si qoto dheer u fahamto nolosha:

1: Aragtida ay dadka kale kaa qabaan waa aragtida ay adiga kaa aamineen uun, ee ha ka dhigin xaqiiqadaada dhabta ah, midkood hadduu ku yiraahdo waxaad tahay qof guuldarraystay waa uun ra'yigiisa, runna ma noqoneyso aragtidaas, ilaa adiga ka aaminto waxa la sheegayo inaad tahay, markaa qofna ha u oggolaan inuu baalashaada kaa rifo!

2: Tagtada lama beddeli karo, balse waa laga faa'iidayaan karaa, in aad ku noolaato wakhti hore waxa ay kharribtaa mustaqbalka, ka fiirsashaduna waxa ay kaa dhigaysaa mid sii xoogaysata, ee bogga rog balse casharka ha iloobin!

3: Xukunka dadka kale ee ku saabsan arrimuha waxay muujinayaan dhabta iyaga waxa ay yihiin, ee ma muujinayaan xaqiiqda taagan! Taasi waa sababta aadan ugu baahnayn inaad u dhawaato dadka kale si aad wax u fahamto.

Noqo mid ka fiirsasho badan, waxaad ka heli doontaa ra'yi kasta, iyaga oo muujinaya fikradahooda hoose!

4: Farxadda waa la kala qaadaa, niyad-jabkuna sidoo kale, naftaada ku xer dadka quman, oo ka fogeey kuwa qalloocan, sida uu Einstein-

ba u yiri: “dadka quman ayaa xal u ah dhibaato kasta, dadka qalloocanse waxay dhibaato geliyaan xal kasta!

5: Farxaddu waa go’aan ee ma’aha dhaqaale, mana dhayalsanayo waxyaabaha maadiga ah (dhaqaalaha), si kalaanse u aaminsanahay in lacagtu tahay sheeyga nolosha, balse taa beddelkeeda waxaan leeyahay nolol oo dhan ma ahan lacagta! Oo inta badan waxyaabaha na farxad geliyaa masoo iibsano karno! Sidaa darteed, ku kalsoonow in farxaddaadu ay ka timaaddo gudahaaga, niyad-jabkaaguna sidoo kale!

6: Annaga ma guul darreysan markaan kufno, laakin waxan guul-darreysannay markaan go’aansanno inaan hakanno, waana sababta qofkii reer ingiriis u leeyahay: “ha joogsan markaad daashid, ee joogso markaad dhammeys-tirto!”

Ka hor inta uusan Edison soo saarin nalka, waxa uu isku dayay kun siyaabood waana shaqeyn waayeen, laakiin waxa uu yiri isaga oo ka faalloonaya, "dadaalkeyga kuma khasaarin, maanta waxaan bartay kun siyaabood oo aan keeni karin in la sameeyo nal!"

7: Haddii aad doonayso in aad noloshaada wax ka baddasho, wax ka beddel fikirkaaga, waa run in Abuu Bakar –RC– uu ahaa ninkii xoreeyay Bilaal bin Rabaax –RC–, laakiin xaqiiqadu waxa ay tahay in Bilaal uu is xoreeyay wakhtigii uu aaminay in uu isagu yahay midka garta u leh inuu Rumeeyo xaqqa!

8: Dunidu waa giraangar, wakhtiguna waa rogroge, sidaad wax u xukunto baa lagu xukumayaa. Dhaan-side kasta waxa laga waraabin doonaa waxa uu isaga horay dadka u waraabiyey, sidaas darteed dadka si fiican u waraabi si adna cabitaankaaga u hagaago!

Eebbana waa cadaalad oo sama haddii aad fidiso, isagana maalin baahi ku heyso buu sama kuu fidiyaa, deeq kasta oo aad samayso waa gacan gargaar oo aad berito keyd u dhigatay.

Haddaba yaa ku ogeysiiyahee!!!...Ilaah ayaa laga yaabaa inuu kaa deeqoo baahida dadka oo dhan, Ilaah baa ka naxariis badan inuu kaa dabcin waayo xanuun aad adiguba walaal Muslim ah horay uga soo dabcisay!

9: Wel-welku waa sida kursi liicliicaya oo kugu dhaqdhaajiya meesha aad joogto, laakiin kuuma dhaqaajiyo horay! La soco Xisaabta mustaqbalka, oo is diyaari, hana ilaawin in berrito ay ku jirto gacanta Eebbe, Eebbena waxa uu addoonka ku fakaro buu u yeelaa, Allana wuu ka deeqsinnimo badan yahay in adiga oo talada u dhiibtay, kuu daayo mashaqada adduunka iyadoo ku darbeyneysol!

10: Adiga iyo dadka kale dhexdiina sii xad idiin dhaxeeya, marnaba ha gelin walaac nafsaddooda, khubarada waddooyinka waxay ku taliyaan in masaafo loo dhaxaysiiyo labada baabuur, waxay u yaqaanaan masaafo badbaadada, baabuurta khariban waxay helaan cid hagaajiso, laakiin marar dhif ah ayaa la helaa dawada qalbiga, markaa wax naftaada u reebo!

[Al-wadan: 25/12/2017].

BEEN ABUUR DHAQAAL LAGU HELO!

Maalmo kaddib markii la tuuray labadii bam ee burburiyay Hiroshiima iyo Nagasaki, New York Times waxay beenisay shucaaca adduunka ka argagaxay ee ku saabsan awoodda bamka noocan oo kale ah siduu u burburiyo dad iyo deeqba!

William Lawrence, oo ah tafaftiraha mowduucyada cilmiga ee wargeyska, ayaa ku qoray maqaal boggiisa hore uu kaga hadlayay sheekooyinka cabsida leh.

Waxa uu sheegay in labadan magaalo aanay wax shucaac ah oo waxyeello ahi ka jirin, isla markaana shucaacyadu aanay ahayn wax aan ka badnayn mid ka mid ah beenaha iyo borobogaandada Japan-ka! Maqaalkan beenta laga buuxiyay ayaa ahaa sababta ugu weyn ee uu ugu guulaystay abaalmarinta Pulitzer, kaddibna waxa soo baxday sannado kaddib in Lawrence uu bishii qaadan jiray laba mushahar oo mid ka mid ah uu ka qaato New York Times, mid kalena Pentagon-ka! Tani waa hal dhacdo oo aan kuu soo gudbiyay, laakiin hubaal ma'aha dhacdo la dhayalsan karo!

In badan oo ka mid ah falanqaynta, daraasaadka iyo fikradaha aad ka akhriso wargeysyada ma'aha fikrado kasoo maaxday kuwa qoraya, laakiin waa fikradaha kooxaha ay u shaqeeyaan!

Iyo in badan oo qoraayaasha ka mid ah ay dhab ahaantii yihiin calooshood u shaqeystayaal, wax u qora ciddii lacagta siisa, sida kooxo dagaalyahanno ah ay waagii hore ugu dagaalami jireen qarankii mushaarkooda bixiyo.

Taasi waa sababta aan weligeed loo inkiri karin in ay berri la dagaalami doonaan calanka ay maanta u halgamayaan! Calooshood-u-shaqaystayaashii seefta beri hore taageero uma heyn fikrad gaar ah, taageeradooda dhabta ahi waxay ahayd jeebkooda, calooshood-u-

shaqaystayaasha qalinka ee maanta joogana waa sidoo kale, balse mid waliba meel buu ka duulaa!

Tifaftiraha wargeyska cilmiga ee New York Times ayaa dikumiinti ku caddeeyey in bambooyinka atomiga ay yihiin kuwo deeggaanka wax tar u leh! Haddii Pentagon-ka uu wax intaas ka badan ka codsan lahaa, sida inuu wax ka qoro faa'iidooyinka bambooyinka u leeyihiin ciidda iyo dalagyada, wuu yeeli lahaa, oo muujin lahaa in bambooyinkan aan hambada reebeyn ay yihiin adeeg loogu hiilinayo reer Japan iyadoo aan aragno in ay uumi bax isu beddeleen dadkii ilbiriqsiyo kaddib markii lagu dhuftay labada bam! Dadka bari iyo galbeedba arrintan wey u siman-yihiin! Maxaa jira waxa halkan ka jira ayaa halkaasna ka jira, oo ba laga yaabo in ay kasii qallafsantahay oo kasii xuntahay!

Mawqif kasta oo siyaasadeed oo ay dawlati qaadata kaddib, waxa aad arkaysaa maqaallo sida roobka u da'aya oo kaaga hadlaysa xikmadda qarsoon ee go'aannadaas sarsare ka dambeyso! Isla qalimaantii waa kuwii hore kaaga digayey cawaaqib xumada ka dhalan karta mowqifkan, maxaa yeelay dawlada ayaa ka soo horjeedsatay!

Tusaale ahaan u soo qaado naag habbeen iyo maalin gaadhi wadatay, waxay isu beddeshay macallimadii doonaysay inay gaadhigeeda u kaxeysato dugsigeeda, waxa ay ka wareegtay naag faasiqad ah, waxa aynna isu beddeshay naag Alle dartii u dadaalaysa oo nafteeda iyo carruurteeda ku dadaasho, sidaas ayay ku andacoodaan!

Qadiyadda cashuur kordhinta waxaad arkaysaa qof karaaya oo ka kululaanaya rootiga masaakiinta, fiiga iskuulada, baakadaha dawooyinka, dawladu wali ma go'aansan in ay cashuurta kordhiso, wax yar oo duruus ah oo ku saabsan cadaalada bulshadana waxba kuma jabna iyo cadaalad sameynta dabaqada dulman! Kaddib baa dowladu go'aansaneysaa inay cashuurta kordhiso, subaxdiina

WACAAL SUGAN

maqaalku waa diyaar, isagoo ay kasoo kareyso horumar dhaqaale iyo in aysan waxba ku jabneyn in nafta loo huro si loo samata bixiyo dalka hooyo, xitaa dhakhaatiirtu waxay dilaan uurjiifka si hooyada loo dhiibo! (laba mixno mid ka badbaad).

Waxaa la moodaa mawduucyada tibaaxaha ee aan ku qori jirnay dugsiga "Qor waxyaabaha soo socda"! ma heleysid waqti aad ku qorto wax ka badan inta aan qoraynay waxyaalo sharaf leh oo macaan!

Waxaase intaas oo dhan ka muhiimsan:

Haddii aad rumaysan laheyd wax kasta oo aad akhrisay, haddaba ha akhriyin!

[Alwadan: 20/12/2017].